



Golaha Imaamyada Soomaaliyeed ee Waqooyiga Ameerika

مجلس الأئمة الصومالي في أمريكا الشمالية

Bayaan

August 23, 2015

Waxaa maanta kusoo gaba gaboobay Xarunta Abuubakar As-Saddique ee Minneapolis **Shirkii 14-aad** ee Golaha Imaamyada Waqooyiga Ameerika ee Soomaaliyeed, shirkaas oo socday **August 21-23, 2015**. Shirka sanadkan ayaa looga haldlay arimo badan oo ay ka midyihiin sidii loo hormarin lahaa dacwada iyo dadaalka ay wadaan maraakista islaamiga ah ee Soomaaliyeed ee ku yaala Waqooyiga Ameerika, iyo sidii ummada Soomaaliyeed ee qurbaha joogta loogu dhiiri-galin lahaa sidii ay diintooda ugu dhaganaan lahaayeen, iyo arimo kale.

- 1- Waxaan ugu baaqaynaa ummada Soomaaliyeed meel kasta oo ay joogaan, gaar ahaan Qurbaha, alle ka cabsi, iyo inay adkeeyaan Midnimadooda iyo wada jirkooda, sidoo kale waxaan ku baaqaynaa in la qaato wadooyinka lagu gaari karo midnimada iyo wadajirka ummada.
- 2- Waxaan ugu baaqaynaa ummada Soomaaliyeed inay wada ilaashadaan Maslaxada guud ee ka dhaxaysa sida; Dal, Diin iyo dadba. Waxaan si adag ugu baaqaynaa ummada Soomaaliyeed inay qabsadaan kitaabka illaahay, iyo sunnada nabiga (scw) ayna dhaqan galiyaan shareecada Islaamka, maamul iyo shacaba.
- 3- Waxaa Majlisku aad uga walaacsanyahay marxalada dadka iyo dalka Soomaaliyeed waxuuna ugu baaqayaa Ummadda Soomaaliyeed iney walaaltinimada xoojiyaan, qabyaaladdana ka waantoobaan, kana maarmaan faragelinta shisheeye noocay doontaba ha ahaatee.
- 4- Waxaan ugu baaqaynaa ummada Soomaaliyeed ee Ku nool Maraykanka inay ka digtoonaadaan, program-ka loogu yeero, Counter Violent Extremism (CVE) Waxaan u aragnaa barnaamij gooni loogu takoorayo bulshada Soomaaliyeed, laguna shaanbadaynayo in Argagaxiso ku dhexjirto. Waxaana kala midnahay CVE diidmadiisa hay'adaha waawayn ee u dooda xuquuqda Rayidka, sida CAIR, ACLU.



Golaha Imaamyada Soomaaliyeed ee Waqooyiga Ameerika

مجلس الأئمة الصومالي في أمريكا الشمالية

- 5- Waxaan ugu baaqaynaa Jaaliyada Soomaaliyeed ee ku nool qurbaha, gaar ahaan Maraykanka inay hamigooda koowaad ka dhigaan siday u illaashan lahaayeen, Diintooda, dhaqankooda islaamiga ah, luuqadooda, iyo inay xil gaar ah iska saaraan bar baarinta ubadkooda iyo badbaadindoonata.
- 6- Waxaan ugu baaqaynaa qoysaska Soomaaliyeed ee Qurbaha inay illaahay ka baqaan guryahana ku dhaqaan sharciga Islaamka, isla mar ahaantaana khilfaad kooda ku xaliyaan si waafaqsan shareecada islaamka, si ilmahooda aysan gacan shisheeye ugu dhicin baylahna aysan u noqon. Sidoo kale waalidiintuna inay gurka fududeeyaan taasoo arimo badan gaashaan u noqon karta.
- 7- Dhalinyarada waxaan ugu baaqaynaa inay illaahay ka baqaan kuna xirnaadaan Culimmada iyo maraakista Islaamiga ah, kana digtoonaadaan inay ku dagmaan fikradaha guracan sida; sida xag-jirnimada iyo fahanka-khaldan. Sidoo kale dhalinyarada wiilal iyo gabdhaba, gaar ahaan qurbaha, waxaan ugu baaqaynaa inay gurka u dag dagaan, kaasoo xayndaab ka noqonaya ficilo aan cawaaqibtooda la mahidin.
- 8- Waxaan ummadda soomaaliyeed in ay ka digtoonaadaan fitnada qabiilka ee baabi'say dal iyo dadba in kabadan labatan sano. Waxaan kaloo ugu baaqaynaa dhamaan ummada Soomaaliyeed Maamul, Madax, shacab iyo odayaal dhaqanba inay illaahay uga baqaan Diintooda iyo dalkooda, kuna heshiiyaan jiritaanka qarankooda, si aysan fursad u siin faragalinta shisheeye, iyo baa'ba ummadooda.
- 9- Ugu danbayntii Golaha imaamyada Soomaaliyeed ee Waqooyiga Ameerika, wuxuu ugu ducaynayaa dhammaan ummada Soomaaliyeed meel ay joogaanba in illaahay dalkooda u dajiyo, dowlad caadil ah oo shareecada ku dhaqdana illaahay siiyo, qalbigeedana isu soo dumo.

Gudoomiyaha Golaha Shuurada
Sh. Abdirahman Sheikh Omar